

# Ka dhigista biilasha tamarta mid la awoodi karo

Abriil 22, 2024 Weydiimaha warbaahinta ([Media inquiries](#))

Dowladda Alberta waxay qaadaysaa tallaabo ay ku ilaalinayso qiima bixiyeyaasha Alberta iyada oo soo saaraysa sharci lagu dhimayo laguna xasilinayo helidda qiimaha adeegyada maxalliga ah.

Awood u heliddaa waa mudnaanta koowaad ee dawladda Alberta, iyada oo qiimaha adeegyada ay tahay diiradda weyn. Soo saarista sharci caawinaya dhimista kharashka biilasha tamarta, dawladdu waxay sii waddaa inay raacdo sida ay uga go'an tahay inay nolosha ka dhigto mid ay awoodi karaan oo dadka Alberta. Tani waxay dheer tahay tillaabooyinka cusub ee muddada gaaban ee looga hortagayo kor u kaca qiimaha korontada waxayna gacan ka geysan doontaa hubinta in la awoodi karo muddada dheer kharashyada aasaasiga ah ee reer Alberta.

"Dadka reer Alberta waxay u baahan yihiin nafis kharashyada koronto ee sarreeya waxaan ku bixin karnaa gargaarkaas annagoo keenayna caddaaladda qiiamaha hellidda khidmadaha maxalliga ah. Ma ogolaan doono in degmooyinka oo ay ku jirto magaalada Kaalgari ay ka faa'iidaystaan kororka qiimaha korontada iyadoo qoysasku la halgamayaan sidii ay nolol maalmeedkooda u dabooli lahaayeen. Waxaan qoysaska Alberta ka ilaalin doonaa isbedbeddelka ba'an ee kharashyada korantada annagoo jaangooyayna xisaabinta khidmadaha gelitaanka maxalliga ah ee gobolka oo dhan. Ma oggolaan doono in degmooyinka oo ay ku jirto magaalada Kaalgari ay ka faa'iideystaan kororka qiimaha korontada iyadoo qoysasku ay la halgamayaan sidii ay nolol maalmeedkooda u dabooli lahaayeen. Waxaan qoysaska Alberta ka ilaalin doonaa isbedbeddelka aadka u daran ee kharashyada korantada annagoo jaangooyayna xisaabinta khidmadaha gelitaanka maxalliga ah ee gobolka oo dhan."

*Danielle Smith, Gudoomiyaha*

Hellidda qiiamaha khidmadaha maxalliga ahi waxay u shaqeeyaan sidii cashuurta dawladda hoose ee dib u celinta oo ay macaamiishu ku bixiyaan biilasha tamarta. Waa wax aan la aqbali karin in degmooyinku boqollaal milyan oo dakhli dheeraad ah ka saaraan dhabarka qiima bixiyeyaasha Alberta oo ay sababaan biilasha tamarta inay noqdaan kharashyo aan la saadaalin karin iyagoo ku xidhaya khidmadooda heer is beddel ah. Dadka reer Kaalgari waxay bixiyeen \$240 doolar khidmadaha hellidda maxalliga ah celcelis ahaan 2023, marka la barbar dhigo \$75 doolar celceliska Edmonton, iyada oo sabab u ah qaacidada Kaalgari ee ku tiirsan heerka isbeddelka. Tani waxay keentay in \$186 milyan doolar ka badan oo khidmad ah ay soo ururiso Magaalada Kaalgari intii la filayay.

"Dadka reer Alberta waxay u qalmaan inay helaan biilasha isticmaalka cadaalad ah oo la saadaalin karo. Dawladdeenu waxay dhegaysataa Dadka reer Alberta waxayna qaadaysaa tallaabo ay wax uga qabaneyso khidmadaha aan la awoodi karin ee biilasha korontada. Hindise sharciyeedkan, waxaanu qaadaynaa tallaabo kale oo aanu ku hubinayno in korantadayadu noqoto mid la awoodi karo, la isku halayn karo, oo waarta jiilalka soo socda."

#### *Nathan Neudorf, Wasiirka Awood u Telida iyo adeegyada Tamarta*

Si loo ilaaliyo qiime bixiyayaasha Alberta, Dawlada Alberta waxay soo bandhigaysaa *Sharciga Waxkabadalka Sharciga Awooda u Helidda Adeegyada Tamarta, 2024*. Haddii la ansixiyo, sharcigani wuxuu kor u qaadayaa awoodi u helidda muddada dheer iyo saadaalinta biilasha tamarta iyadoo la mamnuucayo isticmaalka heerarka isbedbeddelka ah marka la xisaabinayo kharashyada helidda ee degmooyinka.

Heerarka isbedbedelku waa kuwo aad u kacsan, taas oo keenta biilasha korontada oo isbedbeddelaya. Marka ay degmooyinku u isticmaalaan heerkan si ay u xisaabiyaan khidmadaha gelitaanka deegaanka, waxay keentaa biilasha sare ee Dadka reer Alberta iyo hubanti la'aan xagga miisaaniyadda qoysaska. Isbeddelladan la soo jeediyay ayaa jaangooya sida loo xisaabiyo khidmadaha dawladda hoose ee gobolka oo dhan, waxayna la jaan qaadayaan nidaamyada hadda jira ee degmooyinka badankood.

Haddii la ansixiyo, *Sharciga Sharciga Waxkabadalka Sharciga Awooda u Helidda Adeegyada Tamarta, 2024* wuxuu ka hortegi doonaa degmooyinka inay isku dayaan inay ka faa'iideystaan bixiyeyaasha Alberta mustaqbalka. Waxay wax ka baddali doontaa qaybaha sharciga tamarta korontada iyo sharciga adeega gaaska si loo hubiyo in Komishanka Adeegyada Alberta uu leeyahay kormeer sharciyeed xoogan oo ku saabsan sida

kharashaadka degmada loo xisaabiyo loona dabaqo, iyadoo la hubinayo in danta ugu fiican ee Alberta la ilaaliyo.

Haddii la ansixiyo, sharcigani wuxuu sidoo kale wax ka beddelayaa qaybaha *Xeerka Hey'adda Adeegyada Alberta, Xeerka Adeegga Korantada, Sharciga Hay'adaha Dawladda iyo Xeerka Xasiloonida Xulashada Qiimaynta La Dajiyay* si loo beddelo ereyada "Doorashada Qiimaha La Xakameeyey", "RRO", iyo "Bixiyaha Qiimaha La Xakameeyey." oo leh "Qiimaha Dalxiiska Ugu Dambeyay" iyo "Qiimaha Bixiyaha Dalxiiska Dambe" sida lagu dabaqi karo.

## Xaqiiqooyinka degdega ah

- Kharashka helidda khidamda maxaliga asal ahaan waa cashuuro ay degmooyinku ka qaadaan kuwa korontada qaybiya. Khidmadahan ayaa markaa loo gudbiyaa dhammaan macaamiisha qaybiyaha ee degmada, waxayna u muuqdaan shay xariiq ah biilasha tamarta.
  - Xeerka dawlada hoose waxa uu dawladdaha hoose siinaya awooda ay ku dallacaan, wax ka bedelaan, ganacsigooda iyo helidda khidmadaha maxaliga.
- Canshuuraha tooska ah iyo khidmadaha ganacsiga ayaa inta badan lagu daraa biilasha korantada macaamiisha ee hal shay sida **khidmadda helitaanka deegaanka**.
  - **Canshuurta tooska ah** waxaa lagu soo dalacayaa adeegyada tamarta si loogu isticmaalo xaqa ay u leedahay in ay u isticmaasho hantida dhismaha degmada, ka shaqaynta, iyo fidinta tamarta.
  - **Kharashka ganacsigu** waa kharashka ay bixiso adeegatada degmada ee xaqa gaarka ah ee bixinta adeega degmada.
- Qiimaha khidmada helidda ee deegaanka waxaa badanaa lagu xisaabiyaa laba siyaabood midkood:
  - (1) Boqolkiiba kharashka gudbinta iyo qaybinta (keenista), sida caadiga ah 10-15 boqolkiiba.
  - (2) senti go'an, kilowatt saacadood ee kharashka korontada la isticmaalo (Magaalada Edmonton).

- Kaalgari waa degmada kaliya ee ka shaqeysa xisaabinta kharashka laba qaybood:
  - 11.11 boqolkiiba khidmadaha gudbinta iyo qaybinta oo **lagu daray** 11.11 boqolkiiba Xulashada Qiimaha La Dajiyay oo lagu dhufto saacadaha megawatt ee la isticmaalo.

## Xogta la xiriirta

- In biilasha korontada laga dhigo kuwo la awoodi karo ([Making utility bills more affordable](#))
- U doodaha Macaamilka Adeegyada Tamarta ([Utilities Consumer Advocate](#))
- Sharciga 19: Sharciga Wax ka Beddelka Xeerarka Awoodi u Helidda ee Adeegda Tamarta, 2024 ([Bill 19: Utilities Affordability Statutes Amendment Act, 2024](#))

## Wararka la xiriira

- Ka dhigista korontada mid la awoodi karo (Aabriil 18, 2024) [Making electricity more affordable](#) (April 18, 2024)

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo wararka shirarka ([Watch the news conference](#))
- Dhageyso wararka shirarka ([Listen to the news conference](#))

## Weydiimaha warbaahinta

**Ashley M Stevenson**

587-357-2141

Xoghayaha Warfaafinta, Awood u Helidda iyo Adeegyada Tamarta